

Nebraska Medicine

Soo Koobidda Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda

Nebraska Medicine waa siistem aan raadinin fa'iido, waxaana ka mid ah adeegyada ay bixiso Nebraska Medical Center (Xarunta Caafimaadka Nebraska), Bellevue Medical Center (Xarunta Caafimaadka Bellevue) iyo UNMC Physicians (Takhaatiirta UNMC), ujeedadana tahay in ay hoggaamiyaan dunida xagga isbaddalka lagu sameeyo nolosha si mustaqbal caafimaad qaba loogu abuurto dhamaan dadka iyo bulshada, taasoo loo adeegsado barnaamijyada waxbarashada, cilmi baarista cusboon, iyo daryeelka bukaanka aan caadiga ahayn. Siyaasadena waxaa loo qoray si loo sugo siistem dhamaystiran oo xaq ah si kaalmada maaliyadda loogu qeybiyo bukaanka xambaarsan culeyska maaliyadda, hab aan takoorin qofna sida ku saleysan isirka, diinta, midabka, kacsigaa, asal qarab, diinta ama da'da.

Inta soo socota waa soo koobidda kaalmada maaliyadda laga heli karo dhamaan hay'adaha Nebraska Medicine, sida kooxaha takhaatiirta.

Kaalmada Maaliyadda La Bixiyo. Nebraska Medicine waxay bixisaa ceymiska kaalmada maaliyadda degdegga iyo daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah. Bukaanka, qoys ahaan sannadkii soo gasha in ka yar afar jeer heerka saboolnimada federaalka iyo hantida kooban, waxay xaq u yeelan doonaan kaalmada maaliyadda. Daryeelka lacag la'aanta ah waxaa la siiyaa bukaanka hantida kooban iyo dakhliga qoyska la'eg ama ka yar labo-jeer heerka saboolnimada federaalka. Dadka dakhligooda u dhexeeyo 200% iyo 400% heerka saboolnimada federaalka waxay heli karaan daryeel la dhimay. Waa la helaa bixinta daryeelka musiibada, waxaana soo dalban kara dadka qaba kharashka caafimaadka aan caadiga ahayn. Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan tilmaamaha saboolnimada iminka jira iyo boqolkiiba dhimista waxaa laga heli karaa bogga internetka Nebraska Medicine (fiiri hoos **Macluumaadka Badan**).

Kharashka La Soo Dallaco Kama Badan Doono Xisaabta Guud Ahaan La Soo Dallaco. Haddii aad qaadatid kaalmada maaliyadda hoos timaada Siyaasaddena, ma laguugu soo dallici doono in badan xagga degdegga ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah marka loo fiiriyo xisaabta aan guud ahaan ku soo dallacno bukaanka qaba ceymiska dawladda ama midka gaarka ah.

Sida Loo Dalbado Loona Helo Kaalmo. Waxaad dalban kartaa waqti kasta inta ay socoto ballaminta ama dallacaadda biilasha adiga oo buuxiya kaddibna gudbiya arjiga maaliyada iyo warqadaha taageersan. Waxaa la tixgelin doonaa kaalmada maaliyadda ilaa 240 maalin laga bilaabo taariikhda 1aad ee laguugu soo dallaco. Haddii ay kula tahay in aad qabtid daruufo caafimaadka gaar ah ama kugu dhacday musiibo, fadlan la xariir la-talliyaha maaliyadda, telefoonka (402) 559-5346 si lagaaga kaalmeeyo arjigaada.

Si aad u heshid macluumaad badan. Nebraska Medicine waxay internetka soo geliysay siyaasadeeda ku saabsan kaalmada maaliyadda iyo arjiyada maaliyadda www.nebraskamed.com. Dooro Patients/Visitors (Bukaanka/Dadka Soo Booqda) kaddibna u gudub "Financial Assistance" ("Kaalmada Maaliyadda") si aad u ogaatid macluumaadka.

Siyaasadda kaalmada maaliyadda, arjiga kaalmada maaliyadda iyo soo koobidda luqadda sahlan waxaa lagu heli karaa luqado kala duwan sida Ingiriisiga, Isbanishka, Karen, Burmese, Fietnamees, Soomaali, Mandarin, Nepali, iyo Nuer (Sudan) iyo Karenni.

Intaas kaddib, waxaa la helaa La-Talliyayaasha Maaliyadda si lagaaga kaalmeeyo su'aalaha aad qabti, Isniin ilaa Jimco, laga bilaabo 7:00AM ilaa 4:30 PM. Si aad ula xariirtid La-Talliyaha Maaliyadda, fadlan wac (402) 559-5346.

Haddii aad dooneysid in aad qoraal ahaan u soo gudbisid codsiga macluumaadka, fadlan u soo gudbi:

Nebraska Medicine
Ku Socota: Helitaanka Bukaanka - La-Tallinta Maaliyadda
97530 Nebraska Medical Center
Omaha, NE 68198-7530